# Keydi lacag iyo quwada

## Sida loo keydiyo biyaha

- U samey fura hoose oo biyaha ka ilaaliya dhibcida dhamaan tobooyinka iyo diishka qubayska kuna rakib fadhiga musqusha qalabka saara wasaqda oo biyaha keenaya markii la isticmaalo. Qaabkan waxaad si fudud u keydin kartaa konton boqolkiiba 50% biilka biyaha aad isticmaasho.

- Ka fogow biyaha in ay iska socdaan marka ay xunbaynayso saabuunta, cadayeynta ilkahaada, dhaqida khudaarta ama dhaqida saxamanka ka fogow howlahaas inta aad ku jirto in ay biyuhu iska socdaan.

- Iska hubi tubooyinka diishashka qubayska iyo fadhiga musqusha in ay biyuhu ka dhibcayaan.

**Tani qaali ayay ku tahay suuliga socda**




**Tani qaali ayay ku tahay socoshada tubada**




## Keydinta korontada

- Nalalka iyo qalab yada kale ee ku shaqeeya korontada oo aadan isticmaalayn waa in aad ka damisaa darbiga meesha laga demiyo. Tani waxey yareynee sidookale u diyaar ahaashaha isticmaalka. Iibso dhalooyin nalka lagu xiro ee calaamadeysan iyo qalabyada koronta hoose ku shaqeeya una diyaarsan isticmaalka.




*Iibso dhalooyin nalka lagu xiro ee calaamadeysan iyo qalabyada koronta ku shaqeeya*

- Ku dhaq dharka heer-kul hoose kana buuxi mashiinka dhar. Ka fogow in aad isticmaasho qalajiyaha.

- Heer- kulka gaarsii +5 °C qaboojiyaha iyo -18°C qaboojiyaha cuntada lagu xafido.



## Iska yarey kulayliyahaada biilkiisa

- Daar dhamaan qalabka kulaylka siiya qolka una diyaari qalabka heer kulka xadida heer-kul isku mid ah. Xir albaabka si aad u qaboojiso qolalka, hana daboolin qalabka kulaylka siiya qolka.

- Ka fogow dhibaatooyinka qoyaanka iyo kululaysada qaaliga ah adigoo abuuraya hawooyin labo mar maalintii mudo shan daqiiqo ah (dami kulaylisada ilaa waqtigaas). Heer kulka qolka waa inuu ahaado ugu yaraan 16 °C si looga fogaado dhibaatooyinka qoyaanka, laakin daraja kasto oo ka sareysa 21°C, isticmaalkaada kulaylisada ayay ku  kur dhinaysaa shan boqolkiiba 5%.

- Raac isticmaalka kululaysada meter waa in la hubiyaa sistamka kulaylisada sanad kasta.

## Waa maxay sababta loo isticmaalo gaska marka wax la karinayo

- Gaasku waa saaxibka deegaanka waana xalka badbaadada.

- Waa ay fududahay inaad isku hagaajiso heer kulka oo aad hesho natiijo wanaagsan.

- Ma sameeyo gaasku dufan, laakin iska hubi inaad isticmaasho daboolka hawa qaadashada si aad uga fogaato  faafida dufanka  hawada sare lasocda.

$CO_2$-emission

| | Korontada | Gaaska magaalada |
|---|---|---|
| $CO_2$-emission | 619 g/kWh | ≈0 g/kWh |

## Ilaalinta deegaanka – kala sooc qashinkaada

- Ku rid dufanka, kafeega, haraaga cuntada, safaleetiyada la isticmaalo, istiraashada loo isticmaalay caafimaadka, caleemaha, kondomyada, qashinka dhismaha waxii lamida. Salada qashinka ama konteenarka qashinka dhexdiisa.

- Ku rid maadooyin kimikalka sunta leh, daawada aan la isticmaalin, saliida, maadooyin wax lagu qasi karo, batariga waxii lamida, konteenarka qashinka qatarta ah dhexdiisa ee ku dhow dhismahaada.

- Yarey xadiga saabuunta iyo shaanbada la isticmaalay, soona iibso badeecooyinka lagu calaameeyay Eco, sida saabuunta iyo waraaqaha musqusha.

*Markiii aad xulanayso badeeco lagu calaameeyay Eco, waxaad xulanaysa badeecado saxib la ah deegaanka.*